Laynka wakhtiga

Janaayo 1, 2020
Wareega Doorashada ayaa Bilaabma

Murashaxiinta waxay bilaabi karaan qaadashada tabarucaadka ay u qalmaan.

Juulay 1, 2020
Barnaamijku waxa uu u Furmaa Murashaxiinta

Murashaxiintu waxay ku ballan qaadaan inay raacaan sharciyada barnaamijka.

Goor hore oo ah 2021
Foojarada Dimuqraadiyada (Democracy Voucher) waxaa boostadda loogu diri doonaa dadka degen Seattle.

Maayo 17-21, 2021
Murashaxiinta Todobaadka ay Wax soo gudbinayaan

Dhammaan murashaxiintu waa inay soo gudbiyaan Bayaanka Murashaxnimada ee Doorashooyinka Degmadda King.

Juun 4, 2021
Maalinta u dambaysa ee murashaxiinta ay geliyaan barnaamijka.

Ogosto 3, 2021
Doorashada Koowaad

Noofambar 2, 2021
Doorashada Guud

Nala soo xidhiidh maanta tababarka qof ilaa qof ah!
www.seattle.gov/democracyvoucher
Iimaylka: democracyvoucher@seattle.gov Telefoonka: (206) 727-8855



Ma xiisaynaysaa inaad u Tartanto Xafiiska Seattle?

Isticmaal Foojarada Dimuqraadiyada (Democracy Vouchers) si aad u maalgeliso ololahaaga!

Magaalada Seattle (City of Seattle)

Barnaamijka Foojarada Dimuqraadiyada (Democracy Voucher Program)

Sidee barnaamijkan u shaqeeyaa?

1. Seattle Ethics and Elections Commission (SEEC) waxay qaybiyaan afar Foojaro Dimuqraadiyada ah (Democracy Vouchers) oo lagu qiimeeyay $25 mid kasta dadka degen Seattle ee u qalma.
2. dadka degen waxay u qoondeeyaan foojarada musharaxiinta ka qayb galaya ee ay taageeraan.
3. SEEC waxay xaqijisaa foojarka oo waxay u soo daysaa lacag ololaha.

Foojarada Dimuqraadiya (Democracy Vouchers) oo la jaleecayo.

Sanadka 2019 Barnaamijka Foojarada Dimuqraadiyada (Democracy Voucher Program).

Waxaa loo qaybiyay $2,454,475 ilaa 35 olole ah.

Waxaa maaliyada lagu abaal mariyay 66% musharaxiinta ka qayb galaysa.

$25 Waxaa la helay 147,128 foojari ah oo ka yimid 38,092 oo dadka Seattle degen ah.

Noqo Musharax

1. Qabso jadwalka tababarka hal ilaa hal ah.
2. Ku ballan qaad inaad noqoto Murashaxa Foojarada Dimuqraadiyada (Democracy Voucher).
3. U qalan barnaamijka si aad maalgelinta u hesho.
4. Soo qaado Foorajarada Dimuqraadiya (Democracy Vouchers) ka yimid dadka degen Seattle.
5. $ Maalgeli ololahaaga!

Su`aalaha Inta badan la Isweydiiyo

Imisa maalgelin ah ayaa loo heli karaa musharaxiinta?

Ilaa doorashada 2021, $6.8 malyan waxaa loo heli karaa musharaxiinta si loo maalgeliyo ololahooda.

Boosaskeed u qalma maalgelinta?

Duqa magaalada, qareenka magaalada, iyo labba boos gollaha magaalada ah waxay u qalmi doonaan maalgelinta Foojarka Dimuqraadiyada*Democracy Voucher).

Waa maxay xadadka ololaha ee musharaxiinta ka qayb qaadanaya barnaamijka?

	Duqa Magaalada	Gollaha Degmadda Magaalada (magaalada oo dhan)	Qareenka Magaalada
Doorashada Koowaad	$400,000	$150,000	$150,000
Doorashada Guud	$800,000	$300,000	$300,000

Sidee murashaxu ugu qalmaa barnaamijka?

Murashaxiintu waa inay ka soo ururshaan tiro gaar ah oo tabarucaad loo qalmo ah iyo saxeexyada looga qalmo dadka degen Seattle si ay u helaan maalgelinta.

Sideen baan u bilaabaa?

La xidhiidh Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyada (Democracy Voucher Program) si aad u qabsato ballanka tababarka hal qof ilaa hal ah!